# Barnaamijka Shaqo u Weecinta (DWP)

Diversionary Work Program (DWP)

## Waa maxay DWP gu?

Intooda badan codsadayaasha xaqqa u leh Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (MFIP) waxa ay ku jiraan Barnaamijka Shaqo u Weecinta (DWP) muddo 4-bilood ka hor inta aysan helin (MFIP) ka joogtada.

## Waa maxay wanaaga uu leeyahay barnaamijka DWP?

- Waxaad heli kartaa manfacyo badan hadii aad bilowdo shaqo inta aad qaadanayso DWP.
- Bilaha aad qaadato (DWP) laguma xisaabta waqtiga xadidan ee laguu ogol yahay MFIP ka.
- Waxa aad heli la taliye shaqada ah iyo Qorshe Shaqo (EP) oo ka degdegsan kan MFIP ka.
- Waxaa dhici karta inaad hayn ilmood degdeg ku heshid.

## Manfacyadee ayaan ku heli DWP ka?




Manfacyada DWP waxaa ku jira:

- ka bixin kharashaadka guryaha – sida kirada, amaahda iyo korontada
- manfacyo cunto – hubi inaad calaamadiso santuukha si aad u codsato manfaca SNAP ka isla mar
- manfacyada haynta ilmaha (day care)
- waxaa dhici karta iyana inaad hesho $35 oo telefanka lagaaga bixiyo

Cadadka lagaa bixinayaa ma aha wax ka badan deeqda lacagta cadaanka ah ee la siiyo qoysaska baaxadaada qoyskaaga oo kale leh, iyadoon la tirinayn deeq Guryaha ee $110 ah ee MFIP ka. Hadii ay jirto lacag soo harta ka dib kolka deeqda DWP du ay bixiso kharashaadka guriga iyo korontada, qof walba oo qoyska ka mid ahi waxaa uu heli karaa ilaa iyo 70 oo uu u isticmaali karo baahidiisa shakhsiyanka ah.

## Sidee ayaan u bilaabaa?

Tag xafiiska cayrta ee degmada ka dibna buuxi codsi.

Degmaddu waa khasab inay kugu siiso balan isqorid 5-cisho oo maalmaha shaqada ah gudahood ka dib kolka ay hesho codsigaaga. Hadii aad u baahan tahay in ilmaha laguu hayo (day care) degmaddu waa inay kaa caawiso inaad codsato ilmo hayn xilliga balanta isqorida.

Waa in laguu gudbiyaa qaybta ilmo haynta kolka aad hesho la taliye dhanka shaqada ah. Waa inaad ku heshaa la taliye dhanka shaqada ah 1 maalin gudaheed ka dib kolka ay degmaddu go'aansato inaad helayso barnaamijka DWP.

Waa inaad kula kulanto la taliyahaaga dhanka shaqada 10-cisho gudahood si loo sameeyo Qorshe Shaqo (EP)**. Ma aad heli doontid manfac lacag cadaan ah ilaa iyo inta Qorshahaaga Shaqada laga ansaxinayo.**

Waa ra'yi wacan in aad wax walba qorto – aadna la socoto. Ka bilow buuga qoraalka DWP/MFIP Xafid dhamaan warqadaha aad hesho.

## Ma khasab baa in cid walbaa ay sameyso DWP?

Dadka qaarkii ma aadaan DWP. Waxaa aad toos u aadi MFIP hadii:

- aad u codsanayso manfacyo ilmahaaga kaliya uun, ee aadan adigu naftaada u codsanayn. Tusaale ahaan: waxa aad qaadataa SSI, mana lehid sharci, ama waxa aad tahay qaraabo aan waalid ahayn waxa aadna rabtaa inaad u hesho manfacyo ilmaha oo kaliya uun.

- aad 18 ama 19 sanno jir aad tahay aadna doonayso inaad dhamayso dugsi sare ama aad hesho shahaadaada GED (qoyska 2-waalid lehi, waa khasab in labaduba ay xaq u yeeshaan)

- aad 17 sanno jir tahay ama aad ka yar tahay oo aadan dhamayn dugsi sare ama aadan qaadan shahaadada GED (qoyska 2-waalid lehi, waa khasab in labaduba ay xaq u yeeshaan)

- aad tahay waalid kaligii ah aadna haysato ilmo ka yar 12-bilood jir. Waxa aad tan isticmaali kartaa hal mar uun cimrigaaga oo dhan.



- aad qaadatay 4-bilood DWP da, 12-kii bilood ee la soo dhaafay (qoyska 2-waalid lehi, waa khasab in labaduba ay xaq u yeeshaan)

- waalid walba oo qoyska ahi uu helay MFIP ka 12-bilood ee la soo dhaafay

- waalid walba oo qoyska ahi uu helay MFIP 12-bilood ee la soo dhaafay

## Sidoo kale waa aad ka boodi kartaa ama waa aad ka bixi kartaa DWP waxa aadna heli MFIP kolka aad tuso in ugu yaraan hal waalidka oo qoyska ahi:

- uusan shaqayn karin iyadoo sababtu tahay jiro ama dhaawac jiri doona muddo ka 30-cisho, oo ay ku jiro uurku
- guriga looga baahan yahay si uu u daryeelo qof jiran oo qoyska ka mid ah.
- uu codsaday lacagta SSI ama RSDI
- uu damiin yahay ama uu leeyahay garaad hooseeya (IQ) ayna xaaladani ay xadido awooda uu ku shaqeyn karo
- uu 60 sanno jir yahay ama uu ka weyn yahay, ama
- uu joogay United States muddo ka yar 12-bilood oo buuxda ka dib bisha uu soo galay

**Ama hadii cid ka tirsan qoyska:**

- ay xaq u leedahay adeegyada daryeelada caafimaad ee gaarka ah, sida, Haynta (PCA) ama maamule kiis caafimaad madaxa ah
- uu yahay dhibane dhib ka soo gaaray dagaal qoyska dhexdiisa ah

## Intee saacadood ayey tahay inaan geliyo shaqada ama hawlaha shaqo raadinta?

- 1 ka waalid qoyska lehi waa khasab inuu geliyo 130-saac bishii (30.23-saac asbuucii) (hadii aad haysato ilmo ka yar 6 jir waa khasab inaad geliso 87-saac bishii ama 20.23-saac asbuucii)

- 2 da waalid qoyska lehi waa khasab inay geliyaan ugu yaraan 55-saac asbuucii wadar ahaan (isku dar 2 da qof saacadahooda)

## Waa maxay Qorshaha Shaqadu (EP)?



Waa qorshe qoran oo sheega waxyaabaha aad sameyn doonto:

- si aad diyaar ugu noqoto shaqo,
- shaqo aad u hesho
- aadna shaqadaa aad uu haysato

Waxa aad leedahay xaquuq ah inaad agaato waxa ku jira EP. La taliyahaaga dhanka shaqada waa inuu kaa caawiyaa inaad codsato gargaarada haynta ilmaha iyo in lagaa caawiyo gaadiidka, sida kaararka shidaalka ama baasaska lagu raaco.

Qoyska labada waalid leh, hal waalid oo haysta ilmo jira 12-bilood ama ka yar waxaa dhici karta in laga reebo inuu lahaado qorshaha (EP), laakiin hal mar uun cimrigiisa oo dhan.

## EP iyo Waxbarashada

Qorshaha Shaqada ee DWP, waa inaysan ka badnaan kala bar saacadaha la iska rabo waqtiga waxbarashada dad waaweyn, Barashada Afka Ingiriisiga (ESL), ama fasalada (GED) ka la geliyaa. Tacliinta sare kaliya waxaa la xisaabiyaa hadii aad ku dhamayso 4-bilood. Xeerarkaasi waxa ay isbedelaan kolka aad u wareegto barnaamijka MFIP.

Hadii aadan sameyn waxa aad ku ogolaatay qorshaha shaqada (EP), waxa aad waayi manfacyadaada inta ka dhiman kolkaa, mudadda 4-bilood ah ee (DPW) laguu ogol yahay.

## Sidee ayaan ugu wareegaa (MFIP) aakhirka 4-bilood?

Degmaddu waa inay kuu soo dirto foom yar. Waana khasab in ay kuugu soo diraan 30-cisho gudahood aakhirka mudadda 4-bilood ee DWP, ama hadii kale waxa ay noqon inaad dib u bilowdo codsi cusub.

## Ma ka boodi karraa qaybta hawlaha shaqooyinka?

Waxa aad heli kartaa ilaa iyo 12-bilood oo fadhi ah ka dib kolka ilmo ay kuu dhashaan. Bilahaa waxa loo kala qaybin karaa labada waalidka, laakiin wadartoodu kama ay badnaan karaan 12-bilood cimrigaaga oo dhan.

## Cid walbaa ma inay sameysaa Qorshaha Shaqada (EP)?

Dhamaan waalidka qaata barnaamjika (DWP) waa **KHASAB** inay sameeyaan Qorshaha (EP). **Arrintan waxaa loogu yeeraa ka qaybqaadashada caamka ah.** Laakiin waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato Qorshaha Shaqada oo ladifan. Qorshaha (EP) ee ladifani waxa uu lahaan karaa:

- Saacado shaqeyn oo yar ama saacado shaqo raadin ah
- Waxyaabo gaar ah oo aad sameyso iyadoo sababtu tahay in adiga ama ilmahaagu aad naafo tihiin, ama dhibane dhib ka soo gaaray dagaal qoyska dhexdiisa ah.
- Haddii aad xaq u leedahay qorshe shaqo (EP) oo yare bedelan, waxaa lagaa wareejin qorshaha DWP waxaana laguu wareejin MFIP bisha xigta.

## Ma Aan Heli karaa Qorshe Shaqo oo yare Ladifan (EP)?

Kaliya dadka qaarkii ayaa heli kara qorshaha ladifan ee (EP). Tusaale ahaan, hadii aad tahay dhibane dhib ku soo gaaray dagaal qoyska dhexdiisa ah waxa aad xaq u leedahay qorshe ladifan oo ay ku jiraan uga saamixida waxyaabaha qaarkood dagaalka qoyska dhexdiisa ah awgii. Waa inaad la kulantaa taakuleeye qoyska dagaalka ka dhex dhaca ka taakuleeya dadka iyo la taliyaahaaga dhanka shaqooyinka si aad:

- U codsato saamixid, iyo
- U sameeysato Qorshe Shaqo oo leh qorshe amaan.



Hadii aad naafa tahay ama aad la nooshahay qof naafa ah oo u baahan inaad adigu daryeesho, waxa aad heli kartaa qorshaha Qorshe Shaqo oo ladifan iyo caawimaad hawl-wadeenadaada aad ka hesho si loogu "maciino" naafada. Taa macnaheedu waa waxa ay kaa caawiyaan karaan inaad sameysato Qorshe Shaqo oo ladifan ayna kaa caawiyaan inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay si aad u awoodo inaad raaco qorshaha.

## Kolka Qorshahaaga EP ga la dhameeyo:

- Waa inaad ku heshaa manfacyada la bixiyo 2-maalmood gudadood.
- Waxaad kaloo heli doontaa gargaar cunto iyo gargaar hayn ilmo ah.

## Waxa aad xaq u leedahay inaad bedesho qorshahaaga (EP) kolka noloshaadu ay is bedesho?

Wac la Taliyahaaga dhanka shaqada:

- Waxyaabaha ku saabsan noloshaada shakhsiyanka ah ama qoyskaaga ee ka dhiga wax adag inaad adigu shaqo hesho ama aad sii hayso
- Dhib kaa haysta ku hadalka iyo fahamka afka Ingiriiska
- Ay jiraan arrimo dagaal qoyska dhexdiisa ah quseeya
- Ku lug yeelad barnaamijyada adeegyada bulshada
- Ku lug yeelad nidaamyada cadaalada

Haddii hawl-wadeenkaagu uusan bedelin Qorshahaaga Shaqada, waxa aad qaadan kartaa racfaan.



**Xusuusnow:**
Hadii aad bilowdo shaqo mudadda 4-bilood ah ee barnaamijka (DWP), wali aad heli kartaa isla lacagtii aad horey u helaysay.

Lacagta aad ka kasbato shaqada mar ay noqotaba mudadda 4 taa bilood ah hoos uma dhigayso deeqdaada.

## Ka waran hadii aanan u hogaansamin qorshaha EP?

Hadii aad haysato sabab fiican oo aadan ugu hogaansamayn Qorshahaaga Shaqada, u sheeg taa la taliyahaaga dhanka shaqooyinka. Hadii aadan u hogaansansamin qorshahaaga (EP) ga, aadana kala hadlin hawl-wadeenkaaga dhibaato iyo isbedelo kugu soo kordhay, xaq uma aad yeelanaysid barnaamijka kolkaa. **Tan macnaheedu waa MA HELI DOONTID manfacyo lacag cadaan ah inta ka hartay 4 ta bilood**. Waa aad ku sameyn kartaa isbedelo qorshahaaga EP ga ama waxa aad tusi kartaa hawl-wadeenkaaga “sabab fiican” si kolkaa aad isaga ilaaliso xaq u yeelad la’aanta barnaamijka.

“Sababta fiicani” waxa ay noqon kartaa:

- La’aanta cid ilmaha kuu haysa ama gaadiidka
- Jirro
- Xaalad degdeg ah oo kula soo darista
- Jirid la’aan shaqo la heli karo
- Dagaal qoyska dhexdiisa ah

Hadii hawl-wadeenkaagu uusan kugu raacin arrimahaa waxa aad qaadan kartaa racfaan.

## Ka wadan hadii la ii diido ama aanan xaq u yeelan?

Waxa aad ka qaadan kartaa racfaan go’aanka degmada ama la taliyahaaga dhanka shaqada hadii aadan ku raacsanayn go’aankooda.

Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan sida racfaanka loo qaato, ka eeg warqadayada xogta aruursan *Racfaan U Qaadashada DHS*.

## Maxaa dhici kolka mudadda 4-bilood ah ay dhamaanto?

Kolka mudadda 4-bilood ah ee barnaamijka DWP ay dhamaato, waxa aad codsan kartaa inaad hesho manfacyada joogtada ah ee (MFIP) ka. Ma quseeyso hadii aad shaqo haysato iyo hadii kale.

MFIP joogtada ah waxa aad ka heli kartaa:

- Lacag iyadoo cadaan ah toos laguugu soo diro
- Gargaar cunto – hadda waxaa loogu yeeraa SNAP
- Gargaar haynta ilmaha





*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga.* ***La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**